

Takhtarkaagu wuxuu si degdeg ah maanta kuugu gudbiyay isbitaalka si calaamadahaaga lagaa baaro. Sababtoo ah tani waa arin degdeg waxaadna balan ka heli doontaa isbitaalka laba toddobaad gudahood. Arintani waxay noqon kartaa ballan rugta caafimaadka si aad u aragto takhasusle ama baaritaan ogaanshaha, tusaale; baaritaanka kamara ahaan.

Waxaa jira xaalado badan oo caan ah oo lagu xiriirin karo calaamadahaaga, oo ay ku jirto fursadda kansarka. In ka badan 9 ka mid ah 10kii qof ee loo soo gudbiyo habkan lagama helo kansarka, hase ahaatee, waxaa muhiim ah inaan ogaano xaalad kasta oo laga yaaboo in loo baahdo daaweyn degdeg ah.

Waxaad ka warsugtaa isbitaalka maalmaha soo socda si ballan lagu sameeyo. Kala xidhiidh kaaliyaha GP-gaaga lambarka taleefanka ee warqaddan ku qoran haddii aadan 10 maalmood gudahood aadan waxba ka helin. Aad bay muhiim u tahay inaad sameyso dadaal kasta si aad ballantan uga soo qaybgasho.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato xoogaa baaritaanno ah ee isbitaalka kuwaasoo ka caawin kara takhasuslaha inuu fahmo waxa calaamadaaga sababi karta. Baaritaanada waxay noqon karaan:

- Baaritaannada dhiigga
- Raajo saarid
- Baadhitaanka (CT/MRI)
- Baaritaanka kamarada

Mar hore ayaa lagu sheegi doonaa haddii aad u baahan tahay iskaanka ama baaritaanka kamarada, markaa fadlan raac tilmaanta lagu siiyo. Waxaa laga yaabaa in natiijooyinka lagu siiyo isla maalintaas. Khabiirka takhasuska ku leh ayaa awood u yeelan doona inuu ku siiyo macluumaad dheeraad ah oo kugula taliyo tillaabooyinka xiga waxa ay noqon doonaan.

Haddii aad rabto waxaad la iman kartaa saaxib ama qof qoyskaaga ka mid ah. Tani waxay ku caawin kartaa haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan waxa kooxda caafimaadku ay kaala hadlaan. Haddii aad qabto wax welwel ah ama su'aalo ah oo ku saabsan gudbintaada fadlan la xiriir GP-gaaga.

Haddii aad jeclaan lahayd warbixin dheeraad oo ku saabsan gudbinta degdega fadlan booqo: <http://www.cancerresearchuk.org/cancer-symptoms/what-is-an-urgent-referral>

Inta aad sugayso ballantaada, waxaa lagugula talinayaa inaad isku daydo inaad sii wadato dhaqdhaqaaqyadaada/jimicsiga caadiga ah. Haddii daaweyn dheeraad ah loo baahdo, qaybta ugu muhiimsan ee daaweyntaada ka mid ah ayaa noqon doonta in la hagaajiyo caafimaadka jirkaaga - sida joojinta sigaarka iyo hagaajinta heerarka dhaqdhaqaaqa